

Guddiga Madaxa Banaan ee Degmada (IDC, Independent District Commission)

Qariirada sanbalka ah ee lala wadaagay Gudiga Madaxa Banaan ee Degmada. Waxaa laga heli karaa barta portland.gov/transition/districtcommission/documents.

Waa maxay Guddiga Madaxa Banaan ee Degmada?

IDC waxaa lagu abuuray isbadellada ay u codeeyeen codbixiyaashu ee lagu sameeyay Axdiga Magaallada. IDC waa gole bulsho oo madax banaan oo shaqadiisu tahay diyaarinta iyo dhaqan gelinta qorshaha degmada si Portland loogu qaybiyo afar deegaan degmo si looga soo doorto xubnaha goleyaasha magaalada.

Wuxuu ka kooban yahay 13 xubnaha bulshada ah, saddex xubnood oo kale iyo sadex xubnood oo kale oo kayd ah. Dhammaan xubnaha waxaa soo xulay oo magacaabay duqa magaalada waxaana ansixiyay golaha deegaanka bishii Janaayo 2023.

Waa maxay Awooda IDC?

Gudoomiyaha Degmadu wuxuu leeyahay awood gaar ah, haddii sagaal kamid ah 13 xubnood ee Gudoomiyaasha codka leh kamid ah ay qorshaha ansixiyaan, markaas waa la dhaqan gelinayaa waana kama danbayn. Hase yeeshee, haddii kadib labo codbixin, Gudiga Degmadu ay gaari waayaan 9-ka cod ee aqlabiyada ah, markaas nuqulkii ugu danbeeyay ee qorshaha ayaa loo gudbinayaa Golaha Deegaanka si ay uga baaraan dagaan una dhaqan gashaan.

Bishii Nufeembar 2022, codbixiyaasha reer Portland ayaa ogolaaday Ajandaha Codbixinta ee 26-228 kaasoo ku amraayay Magaallada Portland inay dhaqan geliso saddexdaan isbadel ee isku xiran ugu danbayn Janaayo 1, 2025:

- Inay u ogolaado codbixiyaasha inay u taxaan musharixiinta qaabka ay doonayaan, ayagoo adeegsanaaya codbixinta dookha kala horeysiinta.
- Inay abuurto afar degmo oo laga codeeyo, ayadoo sade xubnaha golaha magaalada ah lagasoo dooranaayo si ay u matalaan degmo kasta – taasoo kordhinaysa golaha magaalada kana dhigaysa wadarta guud oo ah 12 xubnood.
- In la dhiso golaha deegaanka oo diirada saaraaya dejinta xeerka iyo la shaqaynta bulshada, ku wareejinaaya shaqada kormeerka maalinlaha ah ee laamaha dawlada duqa magaalada oo dhan lagasoo doorto iyo maamulaha xirfada leh ee magaalada.

Sagaalka kamid ah xubnaha gudiga waa inay ansixiyaan qorshaha degmada si loo dhaqangeliyo. Codeyntaan waxay dhacaysaa Agoosto 2023.



Magaalada Portland waxay kudadaalaysaa inay helitaan macno leh kusamayso adeegyada. Si aad u codsato turjumaad, fasiraad, isbadello, caawimaado, ama caawimaadaha ama adeegyada kale ee kaabista ah, la xiriir 311 (503-823-4000), ee adeegga Relay iyo TTY: 711.



Portland Transition

Voter approved. Community centered. City delivered.



@PortlandGov



@PortlandORGov

Sidee loo go'aaminayaa xuduudaha degmada?

Gudiga Madaxa Banaan ee Degmada ayaa adeegsan doona shuruudaha degmada ee codbixiyaashu ansixiyeen kaasoo ka doonaaya degmo kasta:

- inay isku xirnaadaan oo wada shaqeeyaan;
- adeegsadaan xuduudaha dadka ama siyaasada ee jirey;
- inaysan kala qaybin bulshooyinka masaalixda guud;
- inay isku xiraan wadooyinka gaadiidku; iyo
- inay lahaadaan bulsho is le'eg.

Ma jirto degmo loo samayn doono xuduud ayadoo loo daneynaayo xisbi siyaasadeed gaar ah, sarkaalka xilka haya ee la doortay ama qof kale, ama loo dejinaayo ujeedo la iskugu qasaayo awoodaha codka ee luuqad gaar ah ama koox bulsho laga tiro badan yahay.



Sidee ayaan door ugu yeelan karaa?

1. Soo gudbi fikradaha dadwaynaha!

- Wac 3-1-1 kadibna la wadaag fikradahaaga.
- Iimeelka DistrictCommission@portlandoregon.gov
- Faallooyinka boostada ugu dir ciwaanka Office of Management and Finance, Independent District Commission, 1120 SW 5th Ave., Room 901, Portland, OR 97204
- Isdiiwaan geli si aad [fikir uga dhiibato](#) kulanka soo socda ee IDC ga.

2. Soo dir qariirada degmada! IDC wuxuu doonayaa fikradaha bulshada si looga caawiygo go'aaminta xuduudaha dhammaan afarta degmo. Qariirada ku naqshadee barta: districtr.org/event/Portland2023

3. Ka qaybgal kulan! Dhammaan kulanada IDC waa kuwo dadwayne. Si toos ah ugasoo qaybgal kulanka Dhismaha Portland ama aalada Zoom! Booqo [webseedka IDC](#) si aad u hesho faahfaahinta kulanka.

Jadwalka gudiga

IDC ayaa haysta ku dhawaad sideed bilood si ay ugu dhamaystiraan cilmi baarista, fikradaha dadwaynaha, doonaha, abuurista iyo dib u eegista qariirada, iyo qabashada sideeda dhageysiyada dadwayne ee laga doonaayo. Gudiga Degmadu waa inuu dhamaystiraa shaqadiisa Sibteembar 1, 2023.

Abril 2023: Dhaqan gelinta fikradaha la helay iyo u codeynta shuruudaha qabyo qoraalka qorshaha degmada

Juun 2023: Shaacinta qabyo qoraalka degmada ee fikradaha bulshada iyo ogeysiiska dhageysiyada dadwaynaha

Agoosto 2023: Ka doodista iyo u codeynta qorshaha degmada

MAARSO	ABRIIL	MAAJO	JUUN	LUULIYO	AGOOSTO	SIBTEEMBAR
--------	--------	-------	------	---------	---------	------------

Maarso 2023: Shaacinta qabyo qoraalka shuruudaha degmada ee fikradaha bulshada iyo qabashada dhageysiga dadwaynaha

Maajo 2023: Ka doodista iyo u codeynta qorshaha degmada

Luuliyo 2023: Qabashada sideed dhageysiyada dadwaynaha ah, labo lagu qabaanuo mid kasta oo kamid ah degmooyinka la qorsheeyay

Sibteembar 2023 Muddo xileedka Guddoomiyaasha Degmada ayaa dhamaanaaya

Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo: Portland.gov/Transition/IndependentDistrictCommission.